

**Kulammadii Waaliddiinta/Macallimiinta waxaa la qaban doonaa  
Arbaco 26-ka bisha February (4:00-7:00) & Isniin 2-da bisha March (4:00-7:00)**

**Ballanta Kulanka waxaa laga qabsanayaa online-ka**

Laga bilaabo Jimcaha 14-ka February saacada 6:00 p.m. waxayna xirmaysaa Axadda 23-da bisha February saacadda 11:55 pm.

- Fadlan raac tallaabooyinka fudud si aad ula kulantid macallinka ilmahaaga oo aad jadwalkaaga u degsatid.
- Ka bilow, inaad VIDEOGAAN barbarashada ee nidaamka jadwal dejinta kulammada internetka looga qabsado daawatid. Kan waxaa laga heli karaa tabeellaha “Conference” ee ku yaal shabakadda Dugsiga Sare.
- Halkaan ka gal <https://www.pickatime.com/ephs> ama ka riix shabakadda Dugsiga Sare hoosta “Conference Information” kaddibna riix lifaaqa fudud ee jadwalka.

*XUSUUSNOW: Cinwaan walba ee email oo ku lammaan pickAtime wuxuu lahaan karaa keliya 1 eray fure. Marka, hadii waalidka ey isticmaaleen jadwal sannadkii hore eray fure cinwaanka emailkooda oo ay haddana isticmaalayaan isla cinwaanka emailkaas, waxaan filaynaa inay/inuu isticmaalaan isla eray furahaas.*

**BALLAN QABSASHADII KUUGU HORREYSAY: (haddaad hore ballan u qabsatay, u BOOD #4)**

1. Bogga ugu horreeya waa “Welcome to the EPHS Online Scheduler”. Waxaad KELIYA gelisaa cinwaanka emailkaaga, kaddibna riix “log-in / create an account”.
2. Bogga labaad hoosta “EPHS requires the following information”, xaqiiji cinwaanka emailka, geli magacaaga koowaad iyo magaca awoowaha kaddibna SAMEE eray furehaaga kuu gaarka ah.
3. Bogga xiga, ilma kasta oo dugsiga sare ah, geli lambarkooda caddaynta ardaynimo iyo dhalashadooda-bisha/maalinta/sandak ey dhaseen (MM/DD/YY) kaddibna riix “Add”. Markaas waxaad arki doontaa liistada iyo jadwalka macallinka ardaygaaga.

**HADDII AAD HORE BALLAN INTERNETKA UGA QABSATAY, kaddib markaad riixdid lifaaqa jadwalka:**

4. fadlan isticmaal cinwaanka emailkaaga si aad u geli kartid. Kaddibna isticmaal eray furahaad hore u samaysatay. Ma illowday? Riix dhanka hoose ee tabeellaha “Forgot my password” button. Nidaamka ayaa email kuugu soo diraya mid cusub.

**Magaca macallinka waa la midabbeeyey si loola xiriiriyo jadwalkeeda/kiisa.**

\*\*\*Haddii uu jiro macallin arday ah ama macallin ku meelgaar ah, wuxuu ku qornaan doonaa macallinka joogtada ah magiciisa. Haddii macallinka hore ballan looga qabsaday, waxaad arki doontaa in waqtigiisa la xayiray.

\*\*\* Haddii uu jadwalka cunugaaga la badalay wixii ka dambeeyay Isniinta, Feb. 3, waxaad koo soo bixi macamkiisii hore. Fadlan wac 952-975-8015 si markaasi macalimka cusub balan lagaaga qabto.

5. Mar allaale markaad waqtigaaga gelisid, jadwalkaagu wuxuu markaas kuugu soo baxayaa hab la daabacan karo waxaad kaloo heli kartaa in email xusuusin ah cinwaankaaga laguugu soo diro.

- **AMA** ...Haddii aadan haysan kombiyuutar, waxaa jira foomam codsi oo laga heli karo dugsiga sare. Foomamkani waa in ay soo dhammaystiraan waalidiintaa kadibna waxaa loo qaban doonaa balanta ugu haboon ee la heli karo. Fadlan hubi inaad soo qortid magacyada macallimiinta (Kan kowaad iyo kan labaadbo) aad doonaysid inaad la kulanto iyo maaddada ay baraan macallimiintaasi. Foomamkaan waxaa ugu dambayn la soo celin karaa **Arbacada 12-ka bisha February**.
- **CAAWIMAAD?** Wixii caawimaad la xiriir Camille Hallen 952-975-8015. Sidoo kale iyada wargelin la wax-talagal gaar hadii loo baahanyahay.
- Maamuleyaasha, lataliyeyaasha, horjoogeyaasha ayaa sidoo kale diyaar kuu ah, Waxay ku joogaan xafiisyadooda.
- **Shirarka waxaa lagu qabandoonaa: Main Commons, xafiisyada Waxbarashada Gaarka ah, Media Center, ACE iyo Kholka-aragnimo shaqo.** Waxa qorshaysan in 8 daqiiqo naadi waqtiga iyadoo labo daqiiqo meelah lagu

kala aadiyo ee u dhexeeya. waxaa laga yaabaa in loo heli karo dhibic kooban waqti ah macallimiinta qaar ka mid ah.

**Goobaha maclamiinta iyo macluumaadka waxaa lagu soo diri doonaa ka hor inta aanan kulanka la gaarin .  
Waxaa sidoo kale laga heli doonaa dhammaan meelah dugsiga laga soo galo.**